Department for Levelling Up, Housing and Communities

**Rt Hon Michael Gove MP**
*Secretary of State for Levelling Up, Housing and Communities and Minister for Intergovernmental Relations*

***Department for Levelling Up, Housing and Communities***
4th Floor, Fry Building
2 Marsham Street
London SW1P 4DF

Taleefoon: 0303 444 3450
Email: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk

Lagu diray email ahaan

20 Diseembar 2021

Mudanayaal Guddiga Xuska Grenfell Tower,

Mar labaad waad ku mahadsan tahiin casuumaada aad ii fidiseen in aan idinla kulmo oo aan si toos ah idiinka maqlo howlihiina muhiimka ah. Waxaan ka mahadcelinayaa daacadnimadiina ku saabsan waxa aad uga baahan tihiin dowladda si aad u sii waddaan shaqadan. Waxaan fahamsanahay muhiimada ay leedahay in la idin siiyo kalsoonida iyo caddaynta aad u baahan tihiin si aad dib ugu soo celisaan la shaqayntiina bulshooyinkiina, waxaana aan rabaa in aan xaqiijiyo inaad atintan qoraal ahaan u haysataan.

Waxaan rabaa in aan caddeeyo in aniga iyo dowladdaba ay si aan leexleexad lahayn nooga go'an tahay in aan taageerno Guddiga Xuska Grenfell Tower, si loo abuuro xusuus waarta, oo ku habboon oo ay bulshadu go'aamiso, si loo sharfo kuwii naftooda ku waayay masiibada. Waxaan aqoonsanahay doorka muhiimka ah ee aad ku leedihiin hogaaminta nidaamkan ay bulshadu hogaaminayso, waxaana an rabaa in aan xaqiijiyo in ay tahay mid ay ku sharfeen mas'uuliyiinta dadweynaha kuwaas oo kugu taageeri doona go'aan ka gaarista xusuusta mustaqbalka.  Sidan oo kale, waa sax in dhammaan fikradaha ku saabsan xusuusta lagu soo jeediyo Guddiga Xusuus-qorka si aad uga fiirsataan idinka iyo bulshooyinkiina, waxaana aan sameyn doonnaa wax kasta oo aan awoodo si aan arintaas u taageero.

Waxaan garwaaqsanahay muhiimada Tower-ka iyo dareenka baaxadda leh ee laga leeyahay doodaha ku xeeran arrintan, gaar ahaan qoysaska laga dhintay. Sida aan ku caddeeyey kulankayagii iyo warqaddii aan u diray *The Sunday Times* horaantii bishan, waxa iga go’an in aan dhegeysto qoysaska laga dhintay, kuwa badbaaday iyo xubnaha kale ee sida dhow ay u saameysay ee bulshada deegaanka, ka hor inta aan go’aan laga gaarin Tower-ka.

Sidaan ku falanqeynay shirka, waxaan rabaa inaan xaqiijiyo mabaadii’da la saxiixay 2018-ka ee qeexaya sida ay dowladda uga go’an tahay inay bulshadu udub dhexaad uga noqoto go’aaminta xus ku habboon goobta, iyada oo ay barbar socoto ballan-qaadyadii ay dowladdu samaysay ee ku saabsanaa sida loo qaadanayo go’aannada mustaqbalka ee ku saabsan Grenfell Tower. Kuwan waxaa lagu daray in go'aamada maareynta goobta, iyo go'aan kasta oo keenaya in tower-ka la dumiyo, mudnaantana siin doono nabadgelyada iyo amniga iyo badbaadada goobta iyo in aanan dhibaato u keeni doonin baaritaanka dembiga iyo xog-baritaanka labadaba. Waxaan garwaaqsanahay in dhowr wasiir ay soo qabteen jagadayda tan

iyo markii ballan-qaadyadaas la sameeyay waxaana muhiim ah inaan dib u xaqiijiyo in ay dowladu ku ballan-qaadyadaas ku adkaysato. Waxaanan fahamsanahay inaad iyada si sax ah iigula xisaabtami doontaan.

Ka hadalka arrintan muhiimka ah waa in ay ahaataa mid xasaasi ah oo si buuxda loo ixtiraamo muhiimada Grenfell Tower u leedahay qoysaska dhintay, kuwa badbaaday iyo bulshada deegaanka. Ka labalabayn maayo in aan dib u xaqiijiyo go'aankan oo ah hage sax ah oo ku wajahan waxqabadka dawladda hadda, sidii ay u ahaayeen 2018. Sida aad u caddeyseen, Tower-ka ayaa muhiim idiin ah isaga oo ah meesha ugu dambeysa ee lagu aasey gacalkiinii, sidaas darteed go'aanka ku saabsan mustaqbalkiisa ayaa muhiimad gaar ah u leh kuwa aadka ay saamaynta ugu yeelatay.

Aniga oo arintan maskaxda ku haya, waa ii caddahay in ballan-qaadyadani ay hagi doonaan habka wajihidda ee aniga iyo wasaaradeyda labadaba. Waxaan jeclaan lahaa inaan ahaado mid hufan, sida lagu heshiiyey kulankeenii, waxaan ku faraxsanahay inaad warqaddan dadka u soo bandhigto.

Waxaan maqlay sida caddaaladdu ay qayb muhiim ah uga tahay geedi-socodkiina. Waxaan idiin xaqiijinayaa in dawladda ay ka go'an tahay in ay runta ka ogaato wixii ka dhacay Grenfell Tower iyo sababta ay u dhaceen. Waxaan rabaa in aan xaqiijiyo in go'aamada ku saabsan goobta aysan faragelinin shaqada muhiimka ah ee Booliska Magaalada, Grenfell Tower Inquiry iyo HM Coroner. Waxaa la igu weydiiyay kulankii 13-kii Oktoobar ee aan la yeelanay qoysaska laga dhintay iyo kuwa ka badbaaday in dammaanad lagu siin karo in wixii dumin ah ee suurtagal ah ee lagu sameeyo Tower-ka ka hor inta aan la dhameystirin baaritaanka ama baaritaannada booliisku aysan khatar gelin doonin dembi-baarista. Markii aan kulannay, waxaad ku cel-celiseen inaad u baahan tihiin dammaanad qaadkan si aad ugu kalsoonaataan go'aannada mustaqbalka ee Tower-ka. Arintan si dhab ah ayaan u qaadanayaa. Iyada oo qayb ka ah tallaabooyinka xiga, waxaan sii wadi doonaa inaan la shaqeeyo hay'adaha cadaaladda, si aan idiin siiyo dammaanad kasta oo suurtogal ah.

Ugu dambeyntii, waxaad codsateen dib u eegis madax bannaan oo talo-bixin injineernimada ee ku saabsan xaaladda Tower-ka. Waxaan gebi ahaanba aqbalay baahida loo qabo furfurnaan iyo daah-furnaan si idinka iyo xubnaha kale ee bulshada laga dhintay iyo kuwa badbaadayba, aad sawir buuxa uga heshaan xaaladda dhismeed ee Tower-ka. Waa muhiim in qoysasku helaan macluumaadka ku wargelin doona go'aanka ka hor inta aan la qaadin. Wasaaradu waxaa ay daabacdey warbixino injineernimo oo ku saabsan xaalada Tower-ka iyo dib u eegis madax bannaan horaantii sanadkan. Sida ay arintani muujineyso, tower-ka waa dhisme burburay xaaladdiisuna way sii xumaan doontaa muddo ka dib cimilada iyo isbeddellada xilliyeed awgeed. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan howlaha ilaa iyo hadda aan qabanay - iyo kuwa hadda socda - macnaheedu waa in kuwa ku nool, ka shaqeeya ama wax ku barta meel u dhow ay sii wadi karaan inay cabsi la'aan sidaas sameeyaan. Waxaan jeclaan lahaa inaan taageero qiimeyn madax-bannaan oo dheeri ah oo lagu sameeyo xaaladda Tower-ka, taas oo xubnaha bulshada laga dhintay iyo kuwa badbaaday ay ku heli karaan kalsooni buuxda. Waxaan ka codsaday saraakiishayda inay la shaqeeyaan Guddiga Xuska, si ay taasi suurtogal u noqoto.

Mar labaad waad ku mahadsan tihiin fursadda aan idinkula kulmey, iyo inaad ii ogolaateen inaan maqlo, oo aan wax badan ka fahmo nolosha iyo waaya-aragnimada ka dambeeya Guddiga Xuska Grenfell Tower. Waxaan u arkaa shaqadiina mid muhiim ah waxaanan doonayaa inaan sameeyo wax kasta oo awoodayda ah si aan idiinku taageero dhamaystirka.

Waxaan rajeynayaa inaan mar kale idinla kulmo mustaqbalka si aan u sii wadno wadahadaladan muhiimka ah.

**Aniga oo wax walba oo wanaagsan idiin rajeynaya,**

**RT HON MICHAEL GOVE MP**
**Secretary of State for Levelling Up, Housing and Communities and Minister for Intergovernmental Relations**